



Matahay dhibane kufsi? Ama mataqaanaa ruux uu ku dhacay dhib kufsi? Ma u baahantahay ruux aad la hadasho? Na dabraaya waajibka ah kalsoonida!

Hawl wadayaasha DIXI waxay caawi yaan dhibanayaasha la kufsaday iyo qowsaskooda, waxay faafiyaan macluumaadka ku saabsan dhibka danbe iyo natiijada ka dhalata dhibkaas iyo waliba inay ballaadhiyaan wacyi galinta guud.

Waxaanu sinaa dhibana yaasha iyo qowsaskooda macluumaad iyo taageero sida ugu dhakhso badan ee suurto gala. Waliba adeegay bixiso DiXi waxaa heli kara wiilasha iyo ragga.

Inta badan dadka jooga xarunta waxaa ku dhacay dhib kufsi ama wax lamida. La maadan kulmin codsi, ee taa badalkeed waxaat lakulantay isfahan.

Waxaan ku siin karnaa:

- Fadhiyo koox koox ah iyo warysi mid mid ah ee dhibanayaasha kufsiga iyo qowsaskooda
- Talo bixin ah dhinaca Tilifoonka, e-mailka, iyo qoraalka fariimaha
- Macluumaad ku saabsan waxaad mudato iyo waxa laaga muto
- Gargaar qareen oo bilaasha
- Mawduucyaal fiidkiiya iyo cashiro
- Macluumaad ku saabsan wakaaladaha bixiya kaalmada
- Cashiro lagu qaato iskuulada oo loogu tala galay siyaasiyiinta ururada, iyo guud ahaan wakaaladaha bixiya kaalmada
- Akhrista liiska talooyinka

Waa maxay kufsigu?

Kufsigu waa danbi sirgaxan oo u keena dhibanaha cawaaqibxumo weyn oo ah xagga jidka, nafta iyo bulsho ahaanba. Qaarkoodna dhibkaasi wuu lasocdaa dhibanayaasha noloshooda inta kahadhay oo dhan.

Ruux kasta oo lagu dirqiyay inuu sameeyo xidhiidh galmo, ama halla xoogu ama hasoo waajahdo cabsi dhaba oo ku saabsan noloshooda ama caafimaadkooda, waxaa weeye dhibane kufsi. Sidoo kale waxay noqonaysaa kufsi haddu ruux iska caabin kariwaayo falka sida hadduu miyirkiisu maqanyahay ama uu hordo - xaaladan lama dabaqaayo shardiigii ahaa qasabka ama xoogida.

Inta badan kufsigu wuxuu ka dhashaa isla xidhiidh. Qaarkood - waxaa lagu maga caabaa kufsiga shukaansiga waxaa laga yaabaa labada dhinac inay isbartaan fiidkii, waa qaybyar kufsiga ka dhasha weerarka aay fuliyaan danbiilayaal aan la aqoonin. Waxaa kaloo jira waxaynu ku magacaabi karno kufsiga da'yarta. Noocana waxay ku caanbaxeen runtii dhacdo so noqno-qonhaysa oo aay sameeyaan dhaliyaro isku da'aada oo istaqaana. Xoog ama dirqin guud ahaan lama adeegsado, laakiin odhaahda «maya » lama xushmeeyo.

Adeeganagu waa bilaash ka madax banaan waxkasta oo kalifaada! soo dhawaw marwalba nala soo xidhiidh!

XARUNTA XOGTA EE DIXI EE OSLO

Tilifoonka: 22 44 40 50/930 58 070

e-mail ka: dixi@dixioslo.no

Arbingsgt.1, 0253 Oslo